



Cabot's core values are:

Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Jimce 14^{ta} Oktoober 2022

Gacaliyayaal Waalidiin iyo Daryeelayaal,
Usbuucyo aad mashquul u ah!

Waxaa na soo maray usbuuc leh maalin saynis oo ay soo bandhigeen shaqalaha We The Curious taasoo carruurta dugsiga oo dhan ay ku mashquulsanaayeen waxbarasho la xariirta saynis iyo injineerin.



Fasalka 3 iyo Fasalka 4 waxay booqasho ku tageen Wookey Hole si ay wax badan uga bartaan godadka ay meeshaas leedahay.



Fasalka 5 iyo Fasalka 6 waxay ku mashquulsanaayeen saynis iyo daawashada bandhig la xiriiray bay'adda.

Hambalyo ardaydeenna Risabshanka, kuwaasoo hadda waxbarashadooda ay tahay maalin buuxda oo noo muujiyey sida ay ugu wanaagsan yihiin sida ay diyaar ugu yihiin waxbarsho maalinta oo dhan ah.

Waxaa kaloo aan Cabot ku soo dhaweynay qoysas badan usbuucyadii la soo dhaafay waxaana ogahay in kuwo badanoo idinka mid ah ay la kulmeen kana caawiyeen sidii dugsiga loogu soo dhaweyn lahaa.

Mahadcelinta ugu dambeysa ee ku socota KS1 kuwaasoo ka qeyb galay kulanka waalidiinta ee ku saabsanaa ku-hadalka-luqadda ee fasalka dhexdiisa kaasoo ahaa mashruuc baaritaan ee aan ka qeyb qaadaneyno. Waxaan dhawreynaa inaan hagaajino howl-qabadkeenna si aan u xaqiijino inaan carruurtiina aan siineyno fursadaha ugu wanaagsan.

Ku raaxeyso usbuuca dhammaadkiisa, waxaanna dhawreynaa inaan idiin aragno dhammaantiin maalinta Isniinta idinkoo diyaar u ah usbuuca ugu dambeeya ee Xilligaan.

Mahadsaniidiin,

Mrs L-H

Taariikhaha Xusuus-Qorka

Oktoober – Bisha Taariikhda Dadka Madoow
24^{ta} – 28^{ka} Oktoober Fasaxa Xilliga, dugsigu wuu xiran yahay usbuucaas (Marka laga reebo We Love Sport Club, waraaqaha waxaa la siiyey carruurta la shaqeeysa Phil maalinta Khamiista 27.10.22)

Funaanadaha iyo Jaakadaha



Maadaama ay cimiladu tahay mid aan la isku halleyn karin waqtigaan iyadoo ay jiraan dabaylo qaboow iyo roob marmarka qaarkood, fadlan hubi in canuggaada uu jaakad u soo qaato dugsiga.

Sidoo kale haddii aad dooneysid inaad iibsato funaanado dheeri ah maadaama uu qaboow imaanaayo, fadlan ka feker inaad qeybtaada u sameysid bey'adda iibsana mid la soo isticmaalay. Waxaa jira gaari ay ka buuxaan funaanado oo yaalla xafiiska meeshaasoo aad tabarucaad aad ku rii kartid gasac.

Imaanshaha



Imaanshaha laga soo billaabo usbuucii hore – hambalyo Fasalka Y4, fasal ahaan imaanshihiinnu wuxuu ahaa 97% sidoo kale hambalyo Fasalka Y5 kaasoo uusan qofna ka soo daahin usbuuca oo dhan.

Habka cusub ee furitaanka albaabka ee saacadda 8:40am si loo oggolaado waqti lagu shaandheeyo nawaaxiga dugsiga marka loo baahdo si wanaagsan ayuu u shaqeynayaa. Hadda ciyaha wuxuu dhacaa saacadda 8:45am marka waa caddahay watiga albaabada fasallada ay furmaayaan. Xususnoow inaad canuggaada la joogtid ilaa 8:45am marka ay fasalladooda gelaayaan. Xaadirinta waxay xirmeysaa saacadda 8:55am si fasallada oo dhan ay u xasilaan carruurtana ay diyaar ugu noqdaan waxbarashada durbadiiba. Waqtigaan waa waqtiga ay albaabada xirmaayaan.

Waqtiga Codsiga Dugsiga Sare

Xasuusin Fasalka 6 in aqbalidda codsiga doorashada dugsiyada sare ay tahay 31^{da} Oktoober. Haddii aad u baahan tahay caawinaad arrintaan la xiriirta, fadlan kaalay xafiiska ballanna ka sameysa.

Cabot's core values are:

Partnership Inclusion Excellence

Akhbaar Shaqaalaha

Waxaan macasalaam aan dhihi doonnaa **Miss Keast** iyo **Mrs Thomas** billowga bisha Noofember, iyagoo shaqo ka helay dugsi kale oo deegaanka ah. Labadaba waxay xafiiska ka qabtaan shaqo aad u wanaagsan, waxayna dugsiiga ka shaqeynaayeen muddo sanooyin ah, iyagoo caawinaaya shaqaalaha baridda iyo idinka qoysas ahaanba. Aad ayaan tebi doonnaa labadaba laakiin waxaan u rajeyneynaa guul tallaabada xigta ee shaqadooda.

Waan kula socodsiiin doonnaa marka aan jagadooda cid kale u magacaawno.

Baabuur-Dhigidda

Xasuusin dabacsan ee fadlan baabuurka si nabdoon oo sharci ah ma u dhigi kartaa marka aad carruurta keeneysid ama aad kaxeysid. Waxaa jira qoysas badan oo dugsiiga u soo lugeeya una baahan in ay waddada gudbaan. Waa inaan arrintaan ka dhignaa sida ugu nabdoon ee aan sameyn karno.



Raashiinka Dugsiga

Laga billaabo Isniinta 31^{da} Oktoober qiimaha raashiinka dugsiiga wuxuu uu ka kordhi doonnaa **£2.30** wuxuuna noqon doonnaa **£2.45**.



Hoggaamiyayaasha iyo Ku-Xigeennada Madaxda Guri-Fasaleedka

Aad ayaan ugu riyaaqsannahay ardayda Fasalka 6 oo dhan kuwaasoo oo codsaday jagooyinkaas. Waxay ahayd in ay codsi soo qortaan ka dibna ay ka hadlaan Fadhiiga- ee dugsiiga.

Fasallada 1-6 waxay ka qeyb qaateen cod-bixin ay u sameeyeen si dareen ku jiro.

Waa farxad inaan caddeeyno

Hoggaamiyayaasha (HC) iyo Ku-Xigeennada Madaxda (D) Guri-Fasaleedka ee sannadkaan.

- ❖ Avon HC Najma, D Zakariya H
- ❖ Clifton HC Darin, D Shuaiyb
- ❖ Peros HC Abdirahman, D Anisa
- ❖ Severn HC Zakariya M, D Ameera

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Pring ama Marwa Thomas ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630